# Khuraafaad jabiyeyaasha: Xuquuqda Dhallinyarada

Mythbusters: Youth Rights

## Ha rumayn wax walba oo aad maqasho!

Ha rumaysan wax walba oo aad maqashid! Mashruucayaga Sharciga Dhallinyaradu wuxuu ka jawaabaa boqollaal su'aalood oo ka yimaada carruurta doonaysa in ay ogaadaan sida sharcigu u saameeyo noloshooda. Halkaan waxaa ah dhowr wax oo aan **MARNABA RUN AHAYN!** Qareen la hadal si aad u heshid macluumaad sax ah.



## Khuraafaad #1. Haddii aan ilmo dhalo, waan xoroobayaa.

**KHALAD!** Haddaad ka yar tahay 18, ilmana aad dhashid, wali waxaad ku jirtaa da'yarta. Wali waa in aad raacdid xeerarka ay sameeyaan waalidkaa ama ilaaliyahaaga sharciga ah. Xaq waxaad u leedahay go'aan ka gaaridda ilmahaaga, waalidkaana waxay xaq u leeyihiin in ay adiga go'aan kaa gaaraan. Ma aha in **aadan** xoroobayn oo kali ah, ee hadda waxaa ku saaran mas'uuliyado dheeraad ah oo waalidnimo. Tusaale: Haddii aad guriga ka tagtid oggolaasho la'aan, waxaa lagaa soo qaadi karaa in aad baxsade tahay, ayadoo hay'adda dhowrista carrurtu ay su'aal ka keenayaan habboonaanta waalidnimadaada.

## Khuraafaad #2. Iskay baan meel u degi karaa, ayadoo aan waxba laga soo qaadin waxa waalidku yiraahdaan.

**KHALAD!** Minnesota dhexdeeda, da'da qaangaarku (marka lagaa soo qaadi karo qof weyn) waa 18. Haddii aad ka yar tahay 18, kama guuri kartid guriga illaa haddii:

- Waalidkaa oggolaadaan
- Aad ciidammada gashid
- Maxkamaddu waxay kuu ogolaataa inaad ku noolaato dibadda guriga waalidkaa ama mas'uulkaaga

## Khuraafaad #3. Xataa haddii aan iskay u noolahay, ma arki karo dhakhtar ayadoo aan waalidku ii saxiixin.

**KHALAD!** Haddii aadan la noolayn waalidkaa, oggolaasho ka hayso ama ha ka haysane, kharashkaagana la baxdid, waxaad heli kartaa kaarka caafimaadka, kan ilkaha, iyo adeegga caafimaadka dhimirka. Arrintani mar walba waa xaqiiq inkasta ha noqoto intii ay le'kayd mudaddii guriga aad ka maqnayd. Xataa haddii ay ahayd kaliya dhowr cisho ama asbuuc. Dhaqtarku waa uu ku daweyn karaa xataa haddii aadan ku haysan saxiixa waalidkaaga foomamka.

**Ogow:** Dhaqaatiirta khasab **kuma aha** inay kii fidiyaan adeegyo daryeel aan ka ahayn inay xaalad degdegi ahi jirto. Waxaa dhici karta inaad mas'uul ka noqoto bixinta kharashka wixii daryeelka caafimaad ah ee aad hesho.

Eeg warqada xogta urursan ee
*[Dhaqtar aan aniqu leeyahay ma yeelan karaa hadii aan ka yarahay 18 sanno?]*

## Khuraafaad #4. Waalidkay ima taaban karaan amahaddii kale dhibaatay la kulmayaan.

**KHALAD!** Waalidku waxay adeegsan karaan "edbin jirka ah oo macquul ah ama khafiif ah" **ayadoo aan keenayn dhaawac.** Tusaale ahaan, ka dharbaaxidda barida ilmaha caadiyan waxaa loo tixgeliyaa wax iska caadi ah. Waalidku ma samayn karo tuurid, haraatin, gubid, qaniinyo, ama gacan duuban in uu ku dhufto ilmaha. Waalidku waxay samayn karaan oo fulin karaan xeerar macquul ah. Haddii edbin gacanqaad ahi ay dhaafto in "macquul ah iyo dhexdhexaadka" ah waalidkaa dhib ayaa ugu imaan kara Hay'adda Adeegyadda Ilaalinta Ilmaha [Child Protective Services (CPS)] haddii hay'adda CPS ay go'aamiso tacadi geysi inuu dhacay.

## Khuraafaad #5. Mushkilad ma leh haddii aan dhibaatooyin-sharci galo inta ka horreysa 18 jirkayga, sababtoo ah rikoorka lagu kaydiyo danbiyada-da'yartu waa sir.



**KHALAD!** Rikoorka dambiga-da'yartu siyaalo badan ayuu saamayn xun kuugu samayn karaa. Tusaalooyinkaan baa ka mid ah:

- Xaaladaha qaarkood ayaa rikoorkaaga la siin karaa iskoolkaaga, maxkamado, iyo meelo kaleba
- Haddii aad gashid dambi adigoo qaangaar ah, dambiyadii aad gashay markaad da'yarta ahayd ayaa loo adeegsan karaa in lagugu kordhiyo xarigga lagugu xukumo
- Haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan, rikoorka dambiga-da'yartu wuxuu khatar kuu galinkaraa in lagu tarxiilo
- Ficillada qaarkood haddii lagugu xukumo waxaa lagaa rabaa in aad is qortid in aad tahay dambiile jinsi ama galmo
- Meel aad shaqo ka rabtay ayaa laga yaabaa in ay helaan rikoorkaaga ayagoo ku waydiisanaya in aad u saxiixdid warqadda siidaynta, ama shaqada aad dalbanaysid ayaa u baahan in dib-u-baaris lagugu sameeyo. Dambiyadaadii-da'yarta rikoorkoodii baa soo baxaya, markaas waxaa dhici karta in aan shaqada lagu siin.
- xataa marka faahfaahino cayiman oo qoraalka diiwaanka ah la "qariyo" xaqiiqda ah in qoraal uu jiro iyo wixii dambi ku helid ah ee aad leedahay wali waa ay ka soo bixi diiwaankaaga dowladda.

## Khuraafaad #6. Maddaama aanan ammaan dareemayn markaan waalidkay la degganahay waxaan u guuray ayeyday. Iskoolka waxaa la i yiri ma dhigan kartid waayo ma haysto waalid ii saxiixa warqadaha.

**KHALAD!** Haddii aad ku noolaatid meel guriga waalidkaa ka baxsan, waxaa lagaa soo qaadi karaa in aad tahay hoylaawe (homeless). Waa in laguu oggolaado in aad dhigatid:

- Iskool aad dhigatid kii u dambeeyey, ama
- Iskoolka lagugu qoro ayadoo la eegayo cinwaanka ku meelgaarka ah oo hadda aad ku sugan yahay.

Xaafad walba waxay leedahay xiriiriyaha ardada hoyla’aanta ah oo shaqadiisu tahay in uu kaa caawino isku qoridda iskoolka. Waxaa laga yaabaa in aad isu aragtid in aadan ahayn hoylaawe maadaama aad degaan haysatid. Laakiin haddii aadan la degganayn waalid ama ilaaliye sharci ah oo aad dhib kala kulantid is qoridda iskoolka, la xiriir xiriiriyaha si uu kuu caawino.

## Khuraafaad #7: Iskoolka dhibaato iiguma keeni karto arrin ka dhacday iskoolka debeddiisa.



**KHALAD!** Mararka qaar, booliska ama salkaalka asluubta ayaa iskoolka siin kara rikoorka dambiga-da’yarta. Tani way dhici kartaa xataa haddii dambiga-da’yartaasu ahaa mid aad ku gashay meel ka baxsan iskoolka ama kulammada iskoolka. Waxaad wajihi kartaa hakin ama cayrin ka dhalatay ficillo aad ku samaysay meel ka baxsan hantida iskoolka, kulammadiisa, ama baabuurtiisa haddii dhaqankaagu “ carqalad ku yahay habsocodka iskoolka” ama handadayo ardada ama shaqaalaha.

## Khuraafaad #8: Baraha bulshadda waxaa wadaaga aniga iyo saaxiibbaday, wax walba oo aan soo dhigona annaga ayuu naga dhexeyaa.

**KHALAD!** Macluumaadka la soo dhigo faysbuuggu, Twitter, Instagram, TikTok ama aaladaha (apps) kale si fudud ayuu booliska ama maamulka iskoolka gacanta ugu geli karaa. Waxaa dhacday in arday laga hakiyey iskoolkii ama laga mamnuucay cayaaraha dugsiga sare waayo qof baa helay sawirradooda ayagoo khamro cabbaya ama daroogo isticmaalay. Sawirrada khamro cabbida, ka hadalka hubka, ka hadalka waxyeellayn qof kale, ama farriimo xoogsheegasho ama khashkhashaya ardada kale waxaa lagugu gayn karaa xafiiska maamulaha!

Waxyaalaha la soo dhigo faysbuuggu waxay kale oo dhibaatayn karaan shaqada ama saaxiibtinimada. Internetku xusuus dheer bay leedahay, haddaba ka taxaddar waxa aad soo dhigaysid. Waxaa ugu roon inaad ka soo qaado in wax walba oo aad soo geliso khadka (online) ay arki karto cid walbaa waligoodba, xataa haddii aysan mar walba taasi dhicin.

## Khuraafaad#9: Minnesota kama jiraan wax la yiraahdo xorayn.

**KHALAD!** Waa run in Minnesota aysan lahay qaynuun qeexaya xoraynta ama laga helo marin lagu noqdo xor. Hase yeeshee maxkamadaha Minnesota way aqoonsan yihiin in ay jirto xorayn. Ilmaha waxaa laga soo qaadi karaa xor **haddii** waalidku / mas'uulku aqbalo in ilmuhu si madaxbannaan u noolaan karo. Ilmuhu waa in uu haystaa qorshe uu ka mid yahay meel uu ku noolaado iyi siduu biilasha u bixin lahaa. Carruurta qaar baa waydiista xornimo ayaga oo waxa dhab ahaan ay doonayaan ay tahay in ay ka baxsadaan waxyeellada waalidkood. Haddii aad is leedahay iskaa waad u noolaan kartaa, waalidkaana raalli ka yihiin go'aankaas, ama aadan dareemayn amni waalidkaa markaad la joogtid oo aad doonaysid caawinaad si aad u fahamtid waddooyinka kuu furan, wac Mashruuca Sharciga Dhallinyarada si aad talo uga heshid waxa aad sharciyan samayn kartid. Eeg warqaddayada xoga aruursan ee *Xoroobid*.

## Khuraafaad #10: Carruurtu wax xuquuq ah ma leh.

**KHALAD!** Carruurtu waa ay leeyihiin xuquuq, dhowr ka mid ahina waa:
Carruurtu waxay xaq u leeyihiin in ay:

- Ka ammaan helaan waxyeellada
- Ay heli karaan waxbarasho habboon
- Helaan in Maxkamadda Da'yarta loo soo bandhigo aragtidooda la xiriirta arrimo ayaga khuseeya oo ah danbiga-da'yarta ama dhowridda carruurta
- Ka ammaan helaan xoogsheegashada
- La xiriiraan walaalahood iyo xubnaha qoyska intooda kale markii la geeyo meel guriga ka baxsan



### Su'aalo ma qabtaa ku saabsan xuquuqahaaga?

Wac Youth Law Project *(Mashruuca Sharciga Dhallinyarada)* (877) 696-6529 ama youthlawproject@mylegalaid.org.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**